# WAAXDA CAAFIMAADKA IYO NADAAFADDA MASKAXDA EE MARYLAND IYO MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA

## OGAYSIINTA KU SAABSAN HABDHAQANNADA SIRTA

**OGAYSIINTANI WAXAY KUU SHARXAYSAA SIDA SUUROGAL AH IN LOO ISTICMAALO LOONA SHEEGO MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN IYO SIDA AAD U HELI KARTO MACLUUMAADKAAS. FADLAN SI TAXADDAR LEH U EEGO.**

### Horudhac

Waaxda Caafimaadka iyo Nadaafadda Maskaxda (Department of Health and Mental Hygiene) (DHMH) ee Maryland waxay u huran tahay in ay ilaaliso macluumaadkaaga caafimaadka. Waaxda DHMH waxaa sharci ahaan laga sugayaa in ay sirta u xafiddo Macluumaadka Caafimaadka ee La ilaaliyo (Protected Health Information) (PHI). PHI waxaa ka mid ah macluumaadka lagugu soo ogaan karo ee aan adiga ama dadka kale ka helno ee iyagu ku saabsan caafimaadkaaga jirka ama maskaxda, daryeelka caafimaadka ee aad heshay, ama lacagta aad ka bixisay daryeelka caafimaadka. Sida sharcigu dhigayo, waxaa ogaysiintan lagugu siinayaa warbixin ku saabsan xuquuqda kuu taalla iyo waajibaadkayaga sharciyeed iyo habdhaqannadayada sirta ku toosan ee la xiriira sirta macluumaadka PHI. Si ay daawayn kuu siiso ama ay u bixiso lacagta daryeelkaaga caafimaadka, waaxda DHMH waxay ku weydiin doontaa macluumaad caafimaadeed oo gaar ah waxaana macluumaadkaas caafimaadka la gelin doonaa diiwaankaaga. Diiwaanka waxaa caadi ahaan ku jira calaamadahaaga cudur, natiijooyinkaaga baaritaannada, cudurrada lagugu sheegay, iyo daawayntaada. Macluumaadkaas, oo loo yaqaanno diiwaankaaga caafimaadka ama caafimaadeed, oo sharciga lagu nidaamiyo iyagoo ah macluumaad caafimaadka ku saabsan, waxaa loo isticmaali karaa ujeeddooyin kaladuwan. Waaxda DHMH iyo Shariigyada ay Ganacsiga iska kaashadaan waxaa laga sugayaa in ay raacaan habdhaqannada sirta ku toosan ee Ogaysiintan ku qayaxan, inkastoo waaxda DHMH ay xafidanayso xaqa aan u leenahay in aan waqti kaste wax ka beddelno habdhaqannadayada sirta ku toosan iyo shuruudaha ku jira Ogaysiintan. Ogaysiinta cusub waxaad nuqulkeeda weydiisan kartaa hay'ad kastoo ka mid ah waaxda DHMH. Waxaa weliba lagu soo daabacaa boggayaga internetka oo ah http://dhmh.maryland.gov.

### Isticmaallada iyo Sheegidyada Rukhsaysan

Shaqaalaha waaxda DHMH waxay macluumaadkaaga caafimaadka isticmaali doonaan oo keliya marka ay shaqadooda qabanayaan. Isticmaallada ka baxsan waxa waaxda DHMH ay caadi ahaan qabato, waa in DHMH ay u hesho rukhsayntaada qoran haddii uusan sharcigu u rukhsaynayn ama u dhigayn, waxaanad rukhsaynta noocaas ah burin kartaa marka laga reebo xaalado kooban. Tusaalooyinka soo socda ayaa ka mid ah siyaabaha suurogal ah in aan annagu macluumaadkaaga caafimaadka u isticmaalno una sheegno:

**Isticmaallada iyo Sheegidyada aanan Oggolaansho lahayn ee Ku saabsan Daawaynta, Lacagbixinta, ama Hawlaha Daryeelka Caafimaadka:**

- **Wixii daawaynta khuseeya:** Waaxda DHMH waxay macluumaadkaaga caafimaadka u isticmaali kartaa ama u sheegi kartaa si ay u oggolaato, u diiddo daawaynta, iyo si ay uga go'aan gaarto haddii daawayntaada caafimaadeed ay habboon tahay. Tusaale ahaan, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee waaxda DHMH ayaa u baahan kara in ay daawayntaada la eegaan bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka taasoo caafimaadka loogu baahan yahay ama si daryeelka la isugu duwo.
- **Si lacagta loo helo:** Waaxda DHMH waxay macluumaadkaaga caafimaadka u isticmaali kartaa una sheegi kartaa si ay adeegyadaada daryeelka caafimaadka uga dirto biilka uguna soo qaaddo lacagta iyo si ay uga go'aan gaarto haddii aad u qalanto in aad adeegyadayada ka qayb qaadato. Tusaale ahaan, bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka ayaa soo dalban kara lacagaha adeegyada caafimaadeed ee aad adigu heshay.
- **Wixii khuseeya hawlaha daryeelka caafimaadka:** Waaxda DHMH waxay macluumaadkaaga caafimaadka u isticmaali kartaa una sheegi kartaa si ay u qiimayso tayada adeegyada la bixiyey, waxayna u diri kartaa xisaab hubiyeyaashayada goboleed ama federaali ah.

**Isticmaallada iyo Sheegidyada Kale ee Macluumaadka Caafimaadka ee Sharcigu Dhigayo ama Rukhsaynayo:**

- **Ujeeddooyinka warbixinta:** Haddii aadan annaga wax kale noo sheegin, waaxda DHMH waxay xasuusinta ballamaha iyo qoraallada kale ee barnaamijka ku saabsan u diri kartaa gurigaaga.
- **Sharcigu dhigayo:** Waaxda DHMH waxay macluumaadka caafimaadka sheegi kartaa marka sharcigu annaga naga rabo ama noo dhigayo in aan sidaas samayno.

- **Waxqabadyada caafimaadka dadweynaha:** Waaxda DHMH waxay macluumaadka caafimaadka sheegi kartaa marka waaxda DHMH laga sugayo in ay soo gurto ama ka warbixiso macluumaadka ku saabsan cudurrada, dhaawacyada, ama si ay tirakoobyada daruuri ah uga wargeliso qaybaha kale ee waaxda ka mid ah iyo masuuliyiinta kale ee caafimaadka dadweynaha.
- **Hawlaha kormeeridda caafimaadka:** Waaxda DHMH waxay macluumaadkaaga caafimaadka u sheegi kartaa qaybaha kale ee waaxda ka mid ah iyo hay'adaha kale si loo qabto hawlaha kormeeridda ee sharcigu dhigayo. Hawlahaas kormeeridda waxaa tusaale u ah hawlaha xisaab hubinta, baaritaannada, baarisyada, iyo shati bixinta.
- **Baareyaasha sababta dhimashada, Baareyaasha Maydka, Maareeyeyaasha Aaska iyo Deeqaha Xubnaha jirka:** Waaxda DHMH waxay macluumaadka caafimaadka ee dhimashada ku xiran u sheegi kartaa baareyaasha sababta dhimashada, baareyaasha maydka ama maareeyeyaasha aaska, iyo ururrada rukhsaysan wixii khuseeya deeqaha ama tallaallada laga sameeyo xubnaha jirka, indhaha, ama unugyada.
- **Ujeeddooyinka cilmibaarista:** Xaalado gaar ah, iyadoo ay kormeerayaan Guddigayaga Dib u eegidda Urur (Institutional Review Board) ama guddi kale oo sirta gooni ugu xilsaaran, waaxda DHMH waxay macluumaadka caafimaadka u sheegi kartaa si loogu caawiyo cilmibaarista caafimaadeed.
- **Ka hortagga halista ku wajahan caafimaadka ama badbaadada:** Si looga fogaado halista daran ee ku wajahan caafimaadka ama badbaadada, waaxda DHMH waxay macluumaadka caafimaadka marka loo baahdo u sheegi kartaa hay'adaha hirgelinta sharciga ama dadka kale ee si macquul ah uga hortagi kara ama u yarayn kara halista waxyeellada.
- **Xadgudubka iyo dayacaadda:** Waaxda DHMH waxay macluumaadkaaga caafimaadka u sheegi doontaa masuuliyiinta habboon haddii aan annagu si macquul ah u aamminsan nahay in ay suurogal tahay in aad dhibbane u noqoto xadgudub, dayacaad, rabshadda guriga, ama dembi kale. Waaxda DHMH waxay macluumaadkaaga caafimaadka inta loo baahdo u sheegi kartaa si looga hortago halista daran ee ku wajahan caafimaadkaaga ama badbaadadaada ama caafimaadka ama badbaadada dadka kale.
- **Hawlaha dawladda ee gaar ah:** Waaxda DHMH waxay macluumaadka caafimaadka ee shaqaalaha militariga iyo ciidankii hore ee dagaalka ku sheegi kartaa xaalado gaar ah, xarumaha xabsiga ah ugu sheegi kartaa xaalado gaar ah, u sheegi kartaa barnaamijyada cayrta ama kaalmooyinka ee dawladda taasoo ku xiran u qalmista iyo qorista, waxayna u sheegi kartaa sababaha amniga qaran awgood, sida badbaadinta Madaxweynaha.
- **Qaraabada, saaxiibbada, ama dadka kale ee daryeelkaaga ku lug leh:** Waaxda DHMH waxay dadka u sheegi kartaa macluumaadkaaga caafimaadka marka ay taasi si toos ah u khusayso hawlaha uga yaalla daryeelkaaga ama bixinta lacagta daryeelkaaga. Waaxda DHMH waxay weliba dadka u sheegi kartaa macluumaadkaaga caafimaadka si iyaga looga wargeliyo halka aad joogto, xaaladdaada guud, ama dhimashadaada.
- **Magdhawga shaqaalaha:** Waaxda DHMH waxay macluumaadka caafimaadka u sheegi kartaa barnaamijyada magdhawga shaqaalaha ee kaalmooyin ka bixiya dhaawacyada ama cudurrada shaqada ku xiran iyadoon qaladka la eegayn.
- **Tusiyeyaasha bukaanleyda:** Hay'adaha ka mid ah waaxda DHMH caadi ahaan ma hayaan tusiyeyaal ama taxaneyeel ay u sheegaan dadka soo waca ama soo booqda ee adiga magacaaga kugu codsada. Hase yeeshee, haddii hay'ad waaxda DHMH ka mid ah ay tusiye hayso, cidda aad tahay looma sheegi doono qof aanan la garanayn oo soo waca ama soo booqda haddii aanan rukhsad loo haynin, oo macluumaadka kooban ee aan sheegno waxaa ku jiri kara magacaaga, goobta aad hay'adda kaga jirto, xaaladdaada guud (matalan, caadi, xasilloon, iwm.) iyo diinta aad haysato.
- **Dacwadaha sharciyeed, doodaha iyo dalbashooyinka:** Haddii aad ku jirto dacwad sharciyeed, dood, ama dalbasho, waaxda DHMH waxay macluumaadkaaga caafimaadka ku sheegi kartaa jawaabta ay ka bixiso amarka maxkamadda ama maamulka, dalabka maxkamadeed, codsiga soo ogaanshaha, baaritaanka cabasho magacaaga lagu diray, ama hawl kaloo sharciyaysan.
- **Hirgelinta sharciga:** Waaxda DHMH waxay macluumaadkaaga caafimaadka u sheegi kartaa sarkaalka hirgelinta sharciga ujeedooyin sharcigu dhigayo awgood ama si looga jawaab celiyo dalab maxkamadeed.
- **Dad kale si loo qabto hawlo rukhsaysan:** Waaxda DHMH waxay qaban kartaa hawlaha kor ku qayaxan iyagoo aan laftigayagu qaban karno, ama waxaan isticmaali karnaa hay'ado aanan waaxda DHMH ka mid ahayn (oo loo yaqaanno Shariigyada Ganacsiga) si hawlahaas ay u qabtaan. Mararka aan macluumaadkaaga PHI u sheegno qof kale oo magacayaga wax ku qabanaya, macluumaadkaaga PHI waxaan ku dhawri doonnaa heshiis habboon oo sirta ku saabsan.
- **Hawlaha Lacag ururinta:** Waaxda DHMH waxay isticmaali kartaa macluumaadka kugu saabsan si ay adiga kuula soo xiriirto si la isugu dayo in lacag loo ururiyo waaxda DHMH iyo hawlaha ay qabato. Macluumaadka kugu saabsan ee aan bixinno waxay ku koobnaan doonaan macluumaadkaaga xiriirka, sida magacaaga, cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefoon iyo taariikhaha aad daawayn ama adeegyo ka heshay waaxda DHMH.

## Xuquuqdaada

**Waxaad Xaq u Leedahay in aad:**

- **Xadayn codsato:** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato xadaynta ama koobidda macluumaadka caafimaadka ee kugu saabsan ee waaxda DHMH ay isticmaasho ama sheegto. Waaxda DHMH waxay kuu hirgelin doontaa codsigaaga haddii ay suurogal tahay, laakiin sharci ahaan waajib kuma aha in ay oggolaato xadaynta la codsado. Marka sharcigu uusan si kale u dhigayn, waaxda DHMH waa in ay kuu hirgeliso codsiga haddii sheegiddu ay ku toosan tahay qorshe caafimaad iyadoo ujeeddadu ay tahay samaynta lacagbixin ama hawlaha daryeelka caafimaadka (oo aanay ujeeddadu ahayn qabashada daawaynta); iyo haddii macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo ay ku saabsan yihiin oo keliya shay ka mid ah daryeelka caafimaadka ama adeeg aad si buuxda lacagta toos uga siisay bixiyaha daryeelka caafimaadka ee aad ka heshay.
- **Codsato wadaxiriir sir ah:** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in waaxda DHMH ay macluumaadka kuugu soo dirto cinwaan kale ama hab kale. Waa in waaxda DHMH ay codsiga kuu oggolaato haddii ay taasi si macquul ah u fududdahay in aan annagu samayno.
- **Baarto oo aad nuqul ka samayso:** Marka laga reebo shayo gaar ah (sida qoraallada daawaynta cilminafsiyeedka, macluumaadka loo soo qaaday dacwado sharciyeed oo gaar ah, iyo macluumaadka caafimaadka ee sharciga ku xaddidan), waxaad xaq u leedahay in aad macluumaadkaaga caafimaadka aragto marka aad qoraal ku codsato. Haddii aad rabto in aad nuqullo ka hesho macluumaadkaaga caafimaadka, waxaa lagu saari karaa lacag macquul ah oo ku salaysan kharashka ku baxa nuqul ka samaynta, boostada, iyo diyaarinta sharraxaadda ama soo koobidda macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo. Waxaad xaq u leedahay in aad doorato qaybaha macluumaadkaaga ka mid ah ee aad rabto in nuqul laga sameeyo iyo in hore laguugu sheego macluumaadka ku saabsan kharashka nuqul ka samaynta. Haddii waaxda DHMH ay macluumaadkaaga caafimaadka ku hayso diiwaanno caafimaad oo elektaroonig ah, waxaan kugu siin doonnaa nuskhad elektaroonig ah waxaanan nuqullada macluumaadka caafimaadka u diri doonnaa hay'adda ama qofka aad adigu tilmaanto, marka xulashadaasi ay tahay mid si cad u muuqata, oo gaar ah.
- **Wax ka beddelid codsato:** Waxaad qoraal ku codsan kartaa in waaxda DHMH ay saxdo ama ay wax ku darto diiwaankaaga caafimaadka. Waaxda DHMH waxay codsigaaga kaaga soo jawaabi doontaa muddo 60 cisho ah gudaheed, iyadoo ilaa 30 cisho lagu dari karo, haddii loo baahdo. Waaxda DHMH codsiga way kuu diidi kartaa haddii DHMH ay ku go'aan gaarto in macluumaadka caafimaadku ay: (1) sax yihiin oo ay dhammaystiran yihiin; (2) yihiin kuwo aanan annagu abuurin oo/ama qayb kama aha diiwaannadayada; (3) yihiin kuwo aanan la oggolayn in la sheego. Haddii waaxda DHMH ay oggolaato codsiga wax ka beddelidda, waaxda DHMH waxay beddeli doontaa macluumaadka caafimaadka wayna ku soo ogaysiin doontaa, waxayna waaxda DHMH isbeddelka macluumaadka caafimaadka u sheegi doontaa dadka kale ee u baahan in ay ogaadaan.
- **Rukhsayn u baahato:** Waxaad xaq u leedahay in aad rukhsayntaada ugu baahato ugu badnaan qoraallada daawaynta cilminafsiyeedka ee la isticmaalo lana sheego, helitaanka wadaxiriirka suuqgelinta ah iyo iibinta macluumaadkaaga PHI.
- **Hesho taxanaha sheegidyada:** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato liiska sheegidyada lagu sameeyey macluumaadkaaga caafimaadka ka dib 14 Abriil, 2003, iyo lixda sano ee ka horreeya taariikhda taxanaha la codsaday. Waxaa ka reeban macluumaadka caafimaadka ee loo isticmaalay daawaynta, lacagbixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka. Maxaa dheer, waaxda DHMH waajib kuma aha in ay kuu soo taxdo sheegidyada adiga laguu soo diray, ku salaysnaa rukhsayntaada qoran, loo bixiyey amniga qaran awgiis, la siiyey saraakiisha hirgelinta sharciga, ama xarumaha xabsiga ah. Lacag lagama qaadi doono ilaa hal liis oo noocaas ah oo sanadkii la bixiyo. Maxaa dheer, waaxda DHMH waxay taxane ka bixin doontaa sheegidyada lagu sameeyey diiwaanka caafimaadka ee elektaroonig ah ee ku saabsanaa daawaynta, lacagbixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, laakiin macluumaadku waxay ku xaddidan yihiin ilaa saddexda sano ee ka horreeya taariikhda codsiga.
- **Iska Reebto:** Waxaad xaq u leedahay in aad hesho wadaxiriirka lacag ururinta waxaanad xaq u leedahay in aad codsato in lagaa reebo ama aad iska reebto wadaxiriirka lacag ururinta. Waxaad weliba xaq u leedahay in lagaa reebo ama aad iska reebto tusiyaha bukaanleyda ee xarunta waaxda DHMH.
- **Ogaysiin hesho:** Waxaad xaq u leedahay in aad boostada ku hesho nuqulka daabacan ee Ogaysiintan iyo/ama nuqulka elektaroonig ah marka aad codsato.
- **Ogaysiin ka hesho wixii jebin ah:** Waxaad xaq u leedahay in aad ogaysiin hesho markastoo jebin lagu sameeyo macluumaadkaaga PHI ee aanan sugnayn.
- **Hesho dhawritaanka macluumaadka hiddesideyaasha:** Haddii mid ka mid ah qaybaha daryeelka caafimaadka ee waaxda DHMH loo arko qorshe caafimaad, waxaa qorshaha caafimaadka ka mamnuuc ah in uu macluumaadkaaga hiddesideyaasha u isticmaalo ama u sheego ujeeddooyin kafaalid oo gaar ah.

- **<u>Hesho dhawritaanka diiwaannada caafimaadka maskaxda:</u>** Haddii adigoo aanan rukhsaynin la sheego diiwaan caafimaadeed oo la sameeyey markii aad heshay adeegyada caafimaadka maskaxda, waaxda DHMH waxay bixin doontaa oo keliya macluumaadka diiwaankaaga ku jira ee muhiim u ah ujeeddada sheegidda loo rabo.

**Si aad Warbixin dheeraad ah u hesho:**
Dukumeentigan waxaa lagu heli karaa luqado iyo nuskhado kale oo buuxinaya xeerasha u yaalla Sharciga Dadka maraykan ah ee Naafooyin qaba (Americans with Disabilities Act). Haddii aad su'aalo qabto ama aad warbixin dheeraad ah rabto, waxaad la xiriiri kartaa: **(Insert Designated Business Unit Privacy Contact Name and Number)**

**Si aad Uga soo warbixiso Dhibaato ku saabsan Habdhaqannadayada Sirta ku toosan:**
Haddii aad u aragto in lagu xadgudbay xuquuqda sirta kaaga taalla, waxaad diri kartaa cabasho.

- Waxaad cabasho u diri kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Nadaafadda Maskaxda (Department of Health and Mental Hygiene), Qaybta Adeecidda Wadajir (Division of Corporate Compliance) lambarka ah 1-866-770-7175.
- Waxaad cabasho u diri kartaa Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Insaanka ee Maraykanka (Secretary of the U.S. Department of Health and Human Services), Xafiiska Xuquuqda Shacabka (Office of Civil Rights). Waxaad wici kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Nadaafadda Maskaxda si aad u hesho macluumaadka xiriirka.

Waaxda DHMH kaama qaadi doonto tallaabo ay kaaga aargudanayso haddii aad cabashooyinka noocaas ah samayso.
**Taariikhda Hirgalka:** Ogaysiintani waxay hirgelaysaa 19 August, 2013.

---

**(Barnaamijyada adeeg bixiya waa in ay hubiyaan in ay xaqiijintan dadka ka saxiixaan)**
Xaqiijinta helitaanka ogaysiintan:

______________________________ __________________
Bukaanlaha ama Wakiilka Rukhsaysan Taariikhda

Haddii xaqiijinta aan la heli karin, sababta sheeg: ____________________________________
Saxiixa wakiilka waaxda DHMH